
Sharci Ku Dhaqida, Sharci-Yaqaanada: *Falan-qeynta Sharci ee Xeerka Qareenada Xeer Lr/30 2004*

**Qore: Garyaqaan: Hassan Farah Maxamed
07 Oktoobar 2012**

1. Hordhac:

Xeerka Qareenada Soomaaliland **Xeer Lr. 30/2004** oo la ansixiyey sanadkii 2004ta, waxa ay ujeedadiisu ahayd in lagu dhaqo laguna maamulo qareenada dalka Jamhuuriyada Soomaaliland kaga xoogsada mihnada qareenimo, balse Xeerka markiiba waxa ku bilaabmay caqabad hor leh taas oo ay sabab u ahayd Golaha Wakiilada oon diidmo iyo ogolaansho midna siinin wax-ka-badalkii ay xeerka ku sameeyeen Golaha Guurtidu, talaabadaas oo ka hor-imaanasa **Qodobada 77aad, iyo 78aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Soomaaliland**. Waxana caqabadaasi sii adkaatay ka dib markii Xeerka laga dacweeyay **Maxkamada Dastuuriga ah ee Jamhuuriyada Soomaaliland** taas oo aqbalaad ka sakow wax go'aan ah oo ay ka soo saartay aysan jirin, maadaama oo sharciga la isku hayo sharcinimadiisa, su'aalina ku jirto dhaqan-galintiisa iyo dabaqaada qodobada Xeerka, waxa ay dabartay in Xeerkaasi taabo-gal noqdo laguna dabaqo mihnada qareenimo.

In kasta oo caqabadaasi jirtay hadana Wasaarada Cadaalada ayaa bixin jirtay wixii ruqsad ah waxana qofka shuruudaha buuxiya siin jirtey. Hadaba, hadiiba la isla qaatey in wax-ka-badal iyo kaabis lagu sameeyo Xeerka, waxa lagama maarmaan ah in wax-ka-badalkaasi noqoto mid mug leh oo si balaadhan loo galo.

Mooshinka ay keeneen 21ka muddanena ma aha mid ujeedadani ku filan, sidoo kale qodobada ay soo jeediyeen muddanayaashu ayay ka taagan tahay qaarkood dood sharci oo khuseysa nuxurka ay xambaarsan yihiin lagu duri karaa dood sharci iyo tafsiir xeel-dheer hadii lagu sameeyo. Dooda qodobada uu taabtey wax-ka-badalka, anoo gudda gali doona, bal marka hore aan si dul xaadis ah oo kooban aan u bayaamiyo galda-loolada Xeerka aniga oo ka eegaya, waxyaabaha ka dhiman ee ay ahayd in xeerku sheego ama cadeeyo.

2. *Xeerku ma qareenada oo kaliya ayaa lagu maamulayaa mise mihnada garyaqaan ama sharci-yaqaan oo dhan baa lagu maamulayaa?*

Xeerkan oo Golaha Wakiiladu ansixiyey sanadkii 2004ka, ma waxaa loogu talo-galay in lagu maamulo mihnada qareenimo mise waxa loogu talo-galey mihnada garyaqaanimo? Mihnada garyaqaanimo ama sharci-yaqaanimo waa mid muhim u ah taabo-gelinta cadaalada dalka Jamhuuriyada Soomaaliland, kobcinta dimuquraadiyada, maamul wanaaga, ilaalinta xuquuqal insaanka shacabka, yagleedida nabada, fududeynta macaamilka ganacsi, kordhinta maalgashiga shisheeyaha, kobcinta dhaqaalaha dalka, hirgalinta nidaam wanaagsan. Si aynu u helno garyaqaan leh muhiimadahaasi waa in la helaa xeer lagu dhaqo garyaqaanada oo lagula xisaabtami karo, marka aan garyaqaan leeyahay waxaan u jeedaa: la-taliyaasha sharci ee qaybaha, macalimiinta jaamacadaha ka dhiga maadada sharciga, la taliyayaasha shirkadaha ee bada sharci ee kala jaad-jaadka ah ku xoogsada kuwaas oo ay ugu horeeyaan kuwa kala taliya shirkadaha arimaha shaqaalaha, ganacsiga, heshiisyada, garyaqaanada wada kana masuulka ah ganacsiga iyo hantida qof aan awood sharci lahayn, halka erayga qareen tilmaamayo oo kaliya qareenada ka dooda maxkamadaha ee matala macmiilka kala gadisan kuwaas oo

u kala bixi kara qareen ciqaabeed, mid madani, mid shareeco iyo mid guud, xiliyada qaarna kusii xeel-dheeraan kara hal waax oo ka mid ah qaybaha waaweyn sida ganacsiga, bangiyada, tamarta, isgaadhsiinta, qoyska, caruurta, dhaxalka IWM. Si kale hadaan u dhigo, qareenku waa garyaqaanada ka hor dooda maxkamadaha kala darajada duduwan.

Iyada oo Xeerka sida ka muuqata waxa si gaar ah loo xusay Qareenada ama mihnada qareenimo, Ma sahlana jawaabta su'aashaasii aan xaga sare isku waydiiney, waxaanay adkaanasaa marka aad hoos u dhugato qodobada kala duduwan ee Xeerka oo aad dhamaantood moodo in ay maamulayaan qareenada ka dooda maxkamadaha, si aynu jawaabta ugu dhawaano dadka ku xoogsada mihnada garyaqaanimo waa kala duwan-yihiin sida tusaalaha sare oo waliba kooban aan ku soo bayaamiyey, waxa ay ahayd in si faahfaahsan oo bal-balaadhan Xeerku u sheego cida lagu maamulayo, oo ay ahayd in lagu maamulo "**Garyaqaanada**" ku xoogsada mihnada garyaqaanimo oo dhan isla markaana daboolo dhamaan noocyada kala gadisan ee mihnada garyaqaanimo ama sharci-yaqaanimo.

3. Xeerku muxuu ka Leeyahay Anshax-marinta qareenada? Sharci ahaan sidee ayey ku Habooneyd in loo Anshax-mariyo Qareenada?

Waxad moodaa galdaloolooyinka ugu faraha badan ee Xeerku in ay tahey qaybta la xidhiidha anshax marinta, sababtu waxa ay tahay xeerku ma bixiyo falalka gaar ahaantooda lagu mutaysan karo anshax marin. Arintu waxa ay sii murgasaa xeerka oon meelna ku xusin urur waynaha qaran ee garyaqaanada, kaas oo ka masuul ahaan lahaa in xubnihiisa uu ku ilaaliyo in ay u dhaqmaan si hufan isla markaana sida ugu sareysa u ilaaliyaan xeer-hoosaadyada anshax marineed ee garyaqaanimo, kuwaas oo sidoo kalana ilaalin lahaa xuquuqda garyaqaanimo iyo madax-baanida garyaqaanada xubnaha ka ah.

4. Qodobada Anshax ee ay tahay in ay Garyaqaanadu guud ahaan, gaar ahaana qareenadu dhawraan?

Qodobada anshax ee ay tahay in lagu dhaqo mihnada garyaqaanimo waa ay badan yihiin, waxanse si kooban jeclahay in aan u soo qaado kuwa ugu muhiimsan ee la'aantood aanu hana qaadi karin sharcigu. Mihnada garyaqaanimo waxa ay ka mid tahey mihnadaha aqooneed ee cid gaar ah oo takhasus u heysataa uuni ku shaqeysan karto, sida dhakhtarka oo kale, hadii mihnadani cid aan u ehel ahayni soo gasho waxa meesha ka dhalanaya dhibaato iyo cawaaqib xumo ku dhaca mihnada, taas oo marka ay ugu yar tahey sharaf dhac, iyo karaamo jab aan laga soo waaqsan karin in ay bulshada uu ku dhex yeelato mihnadaasi ta ay doontoba ha noqotee.

Lafjabka ku dhaca mihnadu waxa kale oo uu saameyn taban ku yeeshaa koritaanka dalka guud ahaan. Maanta waxaan muran ka jirin in badan oo bulshada ka mid ahi in ay aragti khaldan ka aaminsan yihiin guud ahaan mihnada garyaqaanimo gaar ahaana mihnada qareenimo. Karaamo jabka noocan ah waxa sabab u ah markii mihnada ay ka buuxsameen dad aan ehel u ahayn, isla markaana aan iyaga oon ogsooneyn talaabada sharci daro ee ay qaadayaan ay laf jab ku tahay mihnada ayna gayin ee ay gashan yihiin in sharaf dhac iyo laf-jab u keenayaan.

Si loo helo cid anshax marin karta garyaqaanada isla markaana ku hogaamin karta in ay ilaaliyaan xeerasha anshax ama hab-dhaqan ee u dajisani waa helitaanka Golle garyaqaanada kulmiya “Bar Association” Arinta ugu horeysa ee ay Gollaha garyaqaanadu ilaalin lahaa waa sharafta, karaamada, suncada, magac-wanaaga, dhawrsanaanta, iyo lexo-jeclaynta mihnada garyaqaanimo, si looga ilaaliyo in cid aan u ehel ahayn, oon aqoon waxa ay mihnadu gasho, iyo waxa ay gudaan in ay si kas ama kama’ ah u dhantaalaan una bahdilaan.

Gollaha garyaqaanadu waxa ay sidoo kale ilaalin lahayd danta macmiisha soo magan gasha cida mihnada ku shaqaysa ee ku aaminta arimaheeda hoose iyo sirta ay ku aamini waayeen in badan oo bulshada kale ah in aan looga faa’iideysto si aan habooneyn ama garyaqaanadu faafiyaanba ceebaha qarsoon ee cida qareenka ka dhigatey ee ku aamintay arimahooda gaarka ah ee xaas-xaasiga ah. Ku ilaalisa dhamaan garyaqaanada in ay sida ugu sareysa ugu adeegaan macmiilkooda, si sharciga waafaqsana u dhawraan danaha macmiilkooda, kana fogaadaan in ay wax dan ah ka galaan cida ay dacwad iskaga soo horjeedaan in ayna aqabalin in dhinac ay iska soo horjeedaan ka aqbalin hadyad, laaluush, ama dheef kaleba taas oo saameyn toos ah oo taban ku leh mihnada qareenimo ee uu gadhwadeenka ka yahay. Golle noocan oo kale ahi waxa uu dhiiri galin lahaa adkaanshaha cadaalada, iyo in dadku aaminaan bahda garsoorka, taas oo dani ugu jirto dhamaan xubnaha Golle ee ku xoogsada mihnada qareenimo ee kala duduwan.

Gollaha garyaqaanada ee guudi “*Bar Association*” waxa ay suurto galin lahayd in bahda waaxda sharci dejintu kobocdo, in waaxda garsoorku hore-u-marto, in waaxda fulintuna si hufan u gudato waajibaadkeeda, taasi oo imaan lahayd marka lafo-gur sharci iyo naqdin, dhaliil, bayaamin, fasiraad, dood wadaag, iyo dib-u-eegis dhamays tiran ku sameeyaan xeerarka, xeer-hoosaadyada, xeer-nidaamiyayaasha, go’aanda iyo qaraarada maamul ee ka soo baxa waaxaha kala duduwan ee dawlada, kuwaas oo iyaga laftoodu dadaal iyo juhdi dheeraad ah galin lahaa talabo kasta oo ay qaadayaan si aaney ugu kicin talaabo sharciga baal marsan oo hadhaw ay shaleeyaan. Si ujeedadan loo gaadho waxa ay soo saaraan biiraale muddaale ah “Legal Review Journal” oo lagu naaqisho shuruucda, go’aanada, iyo dacwadaha dhamaadey ee ahmiyad gaar ah u leh danta sharci.

Gollaha Garyaqaanadu waxa ay hore-u-mariyaa bahwaynta sharci iyada oo bixisa tababaro gaar ah iyo xirfad dhisid shaqo iyo tababar mihnadnadeed oo ay siiso garyaqaanada ku cusub mihnada ee mihnada ku soo biirey sidoo kalana waxa ay ku xidhaa xubnaha Gollaha ku bahoobey in ay wax la qabsi, dood-wadaag, iyo iskaashi dhex maro Golleyaasha dhigeeda ah ee ka abuuran dunida kale, kuwaas oo kaliya aan keenin khibrad koridhsi balse keenta in hadii karti iyo aqoonta loo baahan yahey ay buuxiyaan ay xubnaha Golluhu shaqo ka heli karaan dalalka dunida ee kale, taas oo lacag adag, khibrad cusub, awood dhisid iyo taba-bar ka sakow dalka u soo jiidi lahayd magac iyo suncad mihnadnimo keeni lahaydna in mihnada noqoto mid heybad leh oo dadkeeda lagu majeerto akhlaaq iyo dhaqan-suuban oo macaamil wanaagsan.

5. Mudane ka tirsan Golayaasha Sharci dajintu ma noqon karaa Garyaqaan?

Mudane ka tirsan golayaasha sharci dajintu waa noqon karaa garyaqaan, balse mabda’iyan kuma shaqaynsan karo mudada uu xilka mudanenimo hayo mihnada garyaqaanimo. Dhar-dhaarada dawladu waxa ay ka kooban yihiin saddex dhadhaar oo

kala duduwan, dhadhaar kastaana waxa uu leeyahay xil iyo masuuliyad guud. Saddexda dhadhaar waxa loogu talo-galay in ay isqabtaan oo midba midka kale saxo isna dhamays tiraan, waax kasta oo ka mid ah saddexda waaxood ee qaranka waxa jirta cid hogaamisa oo maamulka guud u xil saaraan, soona saarta go'aanada lagama maarmaanka ah.

Hadii aynu ku horayno waaxda sharci dejinta oo ka kooban aqalka Wakiilada iyo Guurtidu waxa ay leedahay masuul ka yihiin samaynta iyo soo saarida xeerar lagu taabo galiyo maamulka guud ee dawladnimo ee lagama maarmaanka, hubiyaana in shuruucdaasi loo fuliyey si hufan oo ku haboon, waaxda fulintuna waxa ay fulisaa oo dhaqan-galisaa qodobada sharci ee xeer-dajiyuhu soo saarey, halka waaxda garsoorku ka masuul tahey in dadka dhexdooda, dadka iyo xukuumada (fulinta), IWM ay u kala garnaqdo iyada oo fasiraad ku samaynaya qodobada xeer ee xeer-dajiyuhu soo saaro. Hadaba muddanaha ka tirsan Golayaasha sharci dajintu hadii uu noqdo garyaqaan ku shaqaysta mihnada, waxa jirta caqabado sharci, kuwo damiir, kuwo mabda' iyo kuwo u baahan tafsiir sharci oo balaadhan si aynu si xirfad sharci leh uga gudubno caqabadaha noocaas oo kale ah.

Hadaan ku horeyno Dastuurka Qodobkiisa 48aad waxa uu u dhigayaa ***“xubinta Golaha Wakiilada uma bannaana in ay aqbasho xil kale oo dawladeed, iyada oo xilkii loo doortey heysa, umana banaana inay uga faa'iideysato xilkaasi dano gaar ahaaneed”***. Su'aashu waxa ay noqonaa marka uu qodobkani sidan u dhigan yahay ku shaqaynta mihnada garyaqaanimu, gaar ahaana qareenimo ee xubin ka tirsan Golaha Wakiiladu ma ka hor imaanasaa sida qodobkan ku cad, iyada oo qodobkani tafsiirkiisa aan u dhaafayo cida awooda u leh oo ah Maxkamada Dastuuriga ah, waxaan jecelahay in aan si kooban u sheego xaalaha dhici kara ee isku heynta labadani xil ay yeelanso sharci ahaan. Waxa ugu yar ee labadani mansab isku diidayaan waxa weeyaan in saameyn aan habooneyn uu mudanuhu ku yeesho xaakinka dacwada uu ka qareenka yahey haya, taasi oo ku imaan karta dhawr siyood oo ay ka mid tahay in mansabka dhawrsanaanta iyo xasaanada mudanimo ay keento in loo habrado oo xaakinka haya kiisku tixgalin gaar ah siiyo muddanaha qareenkana ah.

Waxa iyadna suurowda in aan dhab ahaan guddida anshax marinta iyo ruqsad bixintu aysan maamuli karin mudane heysta xasaanad dastuuri ah. Waxa iyadna imaan karta in uu saameyn aan fiicneyn ku lahaado guddida cadaalada maadaama oo xubno ka tirsan guddida ay ka yimaadaan golayaasha sharci dejintu waxa uu saameyn ku yeelan karaa xulista iyo keenida xubnaha golaha uu ku jiraa u soo diranayaan guddida cadaalada, si uu hadhaw uga helo taageero iyo taakuleyn ay ka siiyaan culeys saarida in go'aanada maxkamadaha ka soo baxayaa u dhacaan sida uu rabo ama doonayo ama sida u danta ah macmiilka uu qareenka u yahey. Waxa kale oo dhici karta maadaama oo uu heysto xasaanada dastuuriga ah huwan yahayna sharaftii sharci-dejinta in dadka kala duduwan ee danta ka yeesha goobaha sharci door-bidaan xildhibaan qareenkana ah. Waxa kale oo dhici karta in xeerarka hor yaala golaha uu ka tirsan yahay u dhigo ama saameyn ku yeesho in xeer ama wax-ka-badal xeer loo dhigo si u dan ah macmiil uu kiis ama dacwad u hayo.

Waxa kale oo iyadna sharciyan isweydiin muddan xildhibaan ka tirsan golayaasha sharci dajintu marka uu qareen maxkamadaha ka doodana noqdo, miyaaney taasi wax-u-dhimeyn kala madax-banaanida waaxyaha (dhadhaarada) qaranku ka kooban yahey? Su'aasha sharci waxa ay sii cakirmasaa marka aad ogtahay in garyaqaanda gaar ahaana

qareenadu ka tirsan yihiin waaxda garsoorka, oo fasisha dhaqan-gelisa xeerarka ay sameeyaan sharci dajintu, miyaaney taasi noqoneyn sharci daro hor leh? iyo gaf ka dhan ah Dastuurka dalka? JSL? Su'aasha si aan kuugu sii faahfaahiyo waxad inyar maleysaa laba qareen oo garsoore ka hor doodaya oo dabcan sidii caadada u aheyd badheedhahooda dhiibanaya, balse mid ka mid ahi yahay xildhibaan ka tirsan waaxda sharci dajinta, oo isku qabtey fasiraada qodob sharci oo waa sidaa iyo maahee waa sidaa isku haya, marka uu kii xildhibaanaka ahaa ku doodo maadaama oo uu ka mid ahaa dadka dajiyey qodobkani una codeeyay in ay macnaha sida uu isagu ku doodayo u dajiyeen, wax saameyn ah ma ku yeelanasaa garsoore aan qodobkani tafsiirkiisa hore u sameyn?

Dabcan ma sahlana isku soo wada xoriyoo muddane ka tirsan golayaasha sharci dajintu ma haboona mana wanaagsana in uu qareen mihnada ku shaqaysta noqdo. Waxase haboon in uu muddada uu mudanaha yahay ka baxo adeeg bixinta sharci iyo ku shaqaynta mihnada qareenimo, si aanu uga faa'iideysan awooda sharci dajineed. Sidoo kalana isku heynta labani waxa ay marka ay ugu yartahey dayacaad ku tahay labada danood midkood mar hadaanu fadhi goluhu leeyahay iyo dacwad u mudeysan isku wadi karin, oo mid uun ay noqonaso in uu dayaco waxa taasina luminasaa aaminaada, daacadnimada, iyo habsami u gudashada labadan xilba.

6. Mooshinka Wax-ka-badalka iyo Kaabista Xeerka Qareenada Xeer Lr. 30/2004 YAHEY mid sharci ah?

Mooshinka qoraalka ah ee 21ka xildhibaan u soo gudbiyeen Shirgudoonka Golaha Wakiilada kuna taariikheysanaa 01/09/2012kii. Mooshinkaasi oo ku saabsan wax-ka-badalka iyo iyo kaabista Xeerka Qareenada JSL **Xeer Lr. 30/2004**.

Iyada oo ay muhim tahey in wax-ka-badalka Xeerkaasi si mug leh loo galo, loogana fiirsado si uu noqdo xeer guud ahaan bahda cadaalada, gaar ahaana mihnada garyaqaanimo ama qareenimo lagu maamulo, koobsadana arimaha aan kor ku soo xusey loona galo si mug leh, loogana doodo, lagana qayb-galiyo daneeyayaasha Xeerka khuseeyo oo ay ugu horeeyaan garyaqaanada ku xoogsada mihnada mooshinka golaha la soo hordhigay waa mid oofsadey guud ahaan **Qod. 74 Farqadiisa 2aad ee Dastuurka iyo Qod. 37aad Farqadihiisa 1aad, 2aad, iyo 3aad, ee Xeer Hoosaadka Golaha Wakiilada**, oo ka hadla qaabka mooshinada Golaha Wakiilada loogu soo gudbiyo iyo tirada mudanayaasha soo gudbin kara mooshin.

Waxa mudan in la ogaado in wax-ka-badalka qodobka 2aad si gaar ah dhug loogu yeesho iyada oo maanka lagu hayo falan-qeynta sharci ee aan kor ku soo xusey, sidoo kalana **Qodobka 8aad** oo laga dhigay in ruqsada la siinayo qofka da'diisu gaadhay 30 sanno halkii uu ka ahaa 25 waxa ay dabar cusub iyo caqabad ku noqonasa ardayda darka cilmiga ee sharci ka soo fuley ee u hanweyn in ay mihnada ku shaqeeyaan, iyada oo aan la iska indho tirin in ay baahi u qabaan tababar shaqo iyo taakulo farsamo iyo taageero cilmiba hadana ma haboona in lagu niyad jabsho ardeyda niyadasan Qodobo xanibaad ku ah.

7. Gun iyo Gaba-Gebo:

Waxa aan isku sheegid mudneyn, in la is xasuusiyo mooyaane in mihnada garyaqaanimadu muhiimad weyn u leedahay dhamaan umada reer Soomaaliland, ahmiyadaasi oo dhinacyo badan leh aysa ugu sii daran yihiin in aaminaada iyo isku dhaqida sharcigu dhamays tirto habsami u socodka iyo hanashada adeegyada loo wakiishey hay'adaha qaranka, taas oo kor u qaada hore-u-marisa isla markaana xoojisa hanashada iyo yagleelida nabada iyo amaanka oo hadii umadu isku dhaqida sharciga aaminto ay yaraaneyso in qof kastaaba gacantiisa ku fushado sharciga.

Hadaba hadii ay taasi inaga dhab tahey waxa muhiimad gaar ah mudan in xeerar iyo shuruuc adag lagu dhaqo sharci-yaqaanada ku xoogsada mihnada si karaamada iyo sharafta sharciga iyo cida gacanta ku heysaaba u noqdaan qaar leh heybad, akhlaaq iyo dhaqan toosan oo lagu deydo, taas oo hadafkeedu yahay in cadaalada wax laga qabto lana sugo sharcigana lagu dhaqo sharci-yaqaanada. Waa in Xeerkan mabaadiida uu ka duulayo ay ugu horeysaa hiigsiga fog ee umad leh garsoor iyo cadaalad inta ay iyagu isku maamuleen umadaha kale kaga deydaan. Guntii iyo gaba-gabadii wax-ka-badalka kooban ee Xeerkani ma aha mid koobsanasa dhamaan arimaha aan halkan ku faahfaahiyey, balse waxa ay fursad u tahay into Xeerka loo dhiibo guddi hoosaadka ay khuseesaa uu si mug leh usoo axadho una hirgaliyo.

Allaa Mahad leh.

By Garyaqaan: Hassan Farah Mohamed

Managing Partner of Watershed Legal Services.

(Maqaalkani waxa uu ku soo baxay mareegtan:

<http://somaliiwatershedlegal.com/entry/sharci-ku-dhaqida-sharci-yaqaanada>)